

**SOMALI NATIONAL
BUREAU OF STATISTICS**
Federal Republic of Somalia

TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA

Febraayo 2024



Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Febraayo 2024 ayaa gaaray 142.14, marka la barbardhigo 142.28 bishii Janaayo 2023.

Isbedel bileedka, Febraayo 2024, marka la barbar dhigo Janaayo 2023, ayaa hoos u dhacay -0.10 boqolkiiba. Majirin isbedel la taaban karo bishii Febraayo .

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Febraayo 2023 iyo Febraayo 2024 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 5.65 boqolkiiba, marka la barbardhigo 6.19 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Janaayo 2023 iyo Janaayo 2024.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Febraayo 2024 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Janaayo 2024	
Tusaha bishan (Febraayo 2024)	142.14
Tusaha bishii hore (Janaayo 2023)	142.28
Tusaha sanadkii hore (Febraayo 2023)	134.54
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	-0.10%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.65%

Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12billod

Tixraca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Febraayo 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Febraayo 2024

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Febraayo 2024

Heerka sicir-bararka bisha Febraayo 2024 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) 12kii bilood ee la soo dhaafay, Febraayo 2023 iyo Febraayo 2024.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 5.65 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Febraayo 2023 iyo Febraayo 2024, marka labar bardhigo 6.19 boqolkiiba 12kii bilood, Janaayo 2023 iyo Janaayo 2024.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Febraayo 2024 ayaa sameeyey hoos u dhac dhan -0.10 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Febraayo 2024.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay -0.07 boqolkiiba, bishii Febraayo 2024 marka la barbardhigo sare u kac gaaraya -0.32 boqolkiiba bishii Janaayo 2024. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -1.08 boqolkiiba bishii Febraayo 2024. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -1.01 boqolkiiba Janaayo 2024.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaan wax isbedel bille ah sameynin 0.00 boqolkiiba Febraayo 2024. Sicir bararka sanadlaha ah aya sare u kacay 12.51 boqolkiiba Febraayo 2024. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo sare u kacay 12.49 boqolkiiba ee Janaayo 2023.

Dhamaan qeybaha TSB-da & qeybaha laxushay.

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

War bixin bileedka bisha **Febraayo 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Febraayo 2024(Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 61.87 boqolkolkiiba bishii Febraayo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+94.60 boqolkiiba).
- **Kirada guryaha, Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 12.51 boqolkolkiiba bishii Febraayo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha kirada guryaha (+19.40 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 11.41 boqolkiiba Febraayo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+15.66 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka Raga (+30.60 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 9.68 boqolkolkiiba bishii Febraayo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Adeega Gaadiidka (+30.61 boqolkiiba). Sare u kaca waxaa sababay qiimaha rakabka gawarida dhulka (+45.11 boqolkiiba).
- **Tubaakada** ayaa la diiwaangaliyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 8.79 boqolkiib bishii Febraayo 2024. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid tubaakada gaar ahaan sigaarka (+9.70 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 8.54 boqolkiiba Febraayo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dhalada, Maacuunta & Agabka miisaska (+18.82 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 8.39 boqolkiiba Febraayo 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+14.65 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 7.18 boqolkiiba Febraayo 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu dhigto dugsiga sare oo u gaaraya (+28.26 boqolkiiba).


- **Caafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 5.71 boqolkiiba, bishii Febraayo 2024. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+18.52 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 3.20 boqolkiiba bishii Febraayo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid hoteelada (+4.97 boqolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bishii Febraayo 2024(-)

- Ma jirin isbeddel muuqda ee Sanadkan .

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB –da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Febraayo 2024 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Febraayo 2024(+)

- Guud ah ma jirin sare u kac la taaban karo bishii Febraayo .

Qeybaha ugu waaweyn oo sicirkoodu hoos u dhacay

- Ma jirin hoos u dhac muuqda ee Febraayo .

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Febraayo 2024ee habka (COICOP)

War bixin bileedka bisha **Febraayo 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Febraayo 2023 TSB	Janaayo 2024 TSB	Febraayo 2024 TSB	% Boqolkii ba Bishii iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan Qeybaha TSB	100.00	134.54	142.28	142.14	-0.10	5.65
Cuntada & Cabitaanada	46.04	142.32	140.88	140.78	-0.07	-1.08
Tubaakadda	1.25	159.76	173.80	173.80	0.00	8.79
Dharka & Kabaha	5.03	151.47	169.59	168.74	-0.50	11.41
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	124.43	140.00	140.00	0.00	12.51
Agabka Guryaha	2.93	109.38	119.27	118.73	-0.45	8.54
Caafimaadka	5.00	172.91	182.78	182.78	0.00	5.71
Gaadiidka	3.77	109.16	120.66	119.73	-0.77	9.68
Isgaarsiinta	2.80	103.03	166.78	166.78	0.00	61.87
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	103.85	104.30	104.30	0.00	0.43
Tacliinta	4.00	109.11	116.95	116.95	0.00	7.18
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	145.78	150.45	150.45	0.00	3.20
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	112.01	121.41	121.41	0.00	8.39

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Maarso, 2024 waxaa la baahin doonaa 15 Maajo, 2024. Wixii faahfaahintaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

Lifaaqa 1aad: Dhamaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Febraayo 2024 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB-da

Qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Febraayo 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia